

# Wargeyska Mountain View

## Janaayo 11, 2017

**Jimco, Janaayo 13.....Guddiga Bulshada Dugsiga, 3:15 @Maktabka Dugsiga**  
**Isniin, Janaayo 16.....Ma Jiro Dugsi, Maalinta Dhallashada Martin Luther King, Jr.**  
**Talaado, Janaayo 24.....Shirka Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha, 8:15 @CLC Qolka 183**

### **Fariinta Agaasimaha**

Farxadda Sannadka Cusub dhamaantiin! Sannadka cusub waa bilaabid cusub, fursad aan ku hagaajino waxaa aan rabno in aan ka baddalno noloshena. Sidoo kale, waa waqti aan naftena ku xasuusino waxa aan ballan qaaday sannadka oo idil.

Shaqaaale iyo dugsi ahaan, waxaan xasuusin doonaa ardaydena iyo naftena waxa dugsi naga filaayo, iyo sida ay u muuqato, sida loo qaato iyo sida loo dareemo muujinta waxyaabahaas la filaayo. Waxyaabaha dugsigena filaayo waa in Mountain View Eagles ahaado meel ammaan ah, la muujiyo xushmad, mas'uuliyad, iyo daryeel. Waxaa jira siyaabo badan oo loo raaco waxyaabahaan la filaayo, oo adiga ku suurtoogelin karaa in aad shaqeysatid Star Bucks, looga adeegan karo dukaanka Star Store ama stikarada Agaasimaha 200 ee guriga loo soo diro sida kaarka boostada taaso ardayga siiso fursad uu farxadda kala qeybgalo agaasimaha.

Waad ku mahadsan tahay in aad nagu kaalmeysid in aan caruurtena xasuusino waxa dugsi naga filaayo, iyo sida ay dugsi uga dhigaan meel ammaan ah, farxad leh oo laga shaqeeyo, waxna lagu barto.

### **Waalidiinta iyo Macmacaanka**

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalka xiga ee ka dhexeeyo Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center), maalinta Talaadada, Janaayo 24, marka ay tahay 8:15. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

### **Kaalmo Loo baahan yahay**

Waxaan iminka raadinaa tababare cusub oo ah kaaliyaha aqoonayaanka jimicsiga P.E. si uu u hoggaamiyo fasaladaha P. E. todobaadka oo idil. Arjiileyaasha waxay u baahan yahiin in ay diyaariyaan daruusta, iyo in ay awood u leeyahiin in ay maamulaan tobaneeyo arday. Todobaadkii, tababaraha wuxuu shaqeyn doonaa 29.5 saac, waxaana loo baahan yahay in uu haysto shahaadada kulliyadda labada sanno ama ka sare.

Waxaan kaloo u baahanahay kaalmo ku saabsan kormeerka waqtiga qadada maalin kasta. Arjiileyaasha waa in ay diyaar u yahiin in ay ka shaqeyaan dibadda, heerkul u dhexeeyo 20 digrii iyo 100 digrii, iyo in ay la shaqeyaan dadka kale si ay u kormeeraan boqolaal arday oo ku jira waqtiga nasashada. Waxaa la shaqeyn doonaa 8.5 saac halkii todobaad.

Haddii aad xiiso u qabtid mid ka mid ah boosaskaan, fadlan weydii xafiiska.